School Improvement
Liverpool Limited

Gacaleyaasha Xubnaha Bulsgada Ahow,

School governors (Xubnaha Guddiga Iskuulka Maamula) waa muhiim maadaama ay iskuulada maamulka ka kaalmeeyaan. Xubnahan waa kooxda ugu tirrada badan ee wadanka si tabarucaad ah uga shaqeeya. Waxaa jira in ka badan 2000 school governors ah oo si tabarucaad ah uga shaqeeya iskuulada Liverpool. Tirradaas waa dad badan oo school governors ahaan u shaqeeya oo sameeya oo si wax waxtar leh Waxbarashada bulshadeena wax ugu soo kordhiya.

Waxa aan rabi laheyn inaan xubnaha bulshadiina weydiisano ama ku dhiirigelino inay noqdaan xubno school governor ah. Waxa aan tababari doonnaa oo aan taageeri doonnaa qof walba oo xiiseynaya oo waxa aan la raadin doonnaa guddi maamul oo uu ku biiro.

School governors-kayaga kuma jiraan xubno kala duwanaansho ahaan ku filan oo hey'adahayaga iskuulada maamulana badanaaba kama dhex muuqdaan xubnaha bulshada ay u adeegayaan. Tan micnaheedu waa in ay qeyb weyn oo dadweynaha ka mid ah weli yihiin kuwo aan inta badan ka qeybqaadan go'aamada gudaha iskuulada lagu ggaarayo.

Waxa aan u baahan nahay xubno bulshadiina ka tirsan oo arragtiyo kala duwan wata oo doodaha arrimaha gudaha wax ku soo biiriya oo waxna ka bedela sida la iska caadiyeystey ee wax loo wado waxna loo arko. Doodaha furan waxaa lagu gaaraa go'aano fiiican oo bulshada iskuulka oo idil u wada dan ah.

Waxaa dad qoranshadan aan wadno noogu saa'id ah raadinta helitaanka sidii aan hey'ada iskuul maamulista ugu dhiirigelin laheyn inay dib-u-eegis isugu sameyn lahaayeen iyaga oo qiimeynaya waxyaabaha dhaqanka u noqdey iyo waxyaabaha ay iska aaminsan yihiin iyo sida ay u waxyeeleynayaan siyaasada iyo hab-nidaameedka lagu hawl-galo ee guud ahaan iskuulada laga hirgeliyo. Waxa aan rabnaa inay dhamaan hey'adahayaga iskuul maamulista ka dhex muuqato qani ahaanshaha bulshadayada kala duwan, laakiin waxa aan sidaas yeeli karnaa oo keliyah haddii ay jiraan dad ka tirsan dadka madowga iyo dadka tirsan kooxaha isirada tirrada yar oo yimaada oo hawshana ka qeybqaata.

Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, fadlan Dave Cadwallader kala xiriir dave.cadwallader@si.liverpool.gov.uk (07793840825).

Waa daacad idin ahaadeyaal

Xubin Gollaha Degaanka (Councillor) Tomas Logan
Xubin Gollaha Wasiirada Degaanka
(Cabinet Member), Waxbarashada iyo Xirfadaha

Jonathan Jones
Agaasimaha Waxbarashada



School Improvement Liverpool Limited is a company controlled by a local authority within the meaning of Part V Local Government and Housing Act of 1989.
The controlling authority is Liverpool City Council.